Waxaan ilaalinaynaa nidaamkaada!

# Xiritaanka 9 maalmood Leenka Cagaaran ee METRO.

## Waxay bilaabanaysaa 10 p.m. maalinta Jimcaha, Luulyo 11 ilaa iyo Isniinta, Luulyo 21:

Tareennada mara Leenka Cagaaran ee METRO ma mari doono inta u dhaxaysa Raymond Ave. iyo Union Depot shaqo dayactir oo ka socota awgeed.Adeega Leenka Cagaaran ee METRO between Raymond Ave.

Adeega baska oo midan beddelayso ayaa la heli doonta inta lagu jiro waqtigan. Tag barta metrotransit.org/closure si aad u ogaato halka ay ku yaaliin joogsiga baska lagu beddelay tareenka.

## Xilli hore samayso qorshaha!

- Wakhtiga baska beddelka ah wuu kala duwanaan karaa waxaana laga yaabaa in safaradu ay qaataan wakhti dheer sababo ka dhanka jidka la marayo iyo xaaladaha ka dhanka gaadiidka. **Fadlan waqti dheeri ah u qorshee safarkaaga.**
- Jadwalka baska beddelaada ah ayaa laga heli karaa barta metrotransit.org - kala soco basaska beddelka ah NexTrip oo laga helayo barta metrotransit.org/nextrip
- Ablikeeshinadeena ayaa ka dhiga lacag bixinta mid fudud - wax badan oo midan ku saabsan ka ogoow barta metrotransit.org/app

## La soco Digniinada loo diro Rakaabka inta lagu jiro xilliga dayactirka tareenka!

Ha la yaabin, maanta iska diiwaan geli barta metrotransit.org/alerts si aad u hesho wixii soo kordha ee dadka loogu soo diro iimaylka ama fariin-qoraaleedka!

Ama nagala soco X waxyaabaha soo dhigna ee "digniinada kaliya" ah barta **@MT_MN_Alerts, Facebook.com/MetroTransitMN**, hadana waxaad ka heli kartaa Bluesky barta **@metrotransitmn.bsky.social** si aad ula socoto akhbaaraadkii ugu danbeeyay.




Wixii kaalmo dheeraad ah, ka wac Xarunta lagu bixiyo Xogta gaadiidka lambarka 612-373-3333.

Ka hel wax kasta oo aad rabto barta metrotransit.org/closure.

## Dayactirka ka-hortagga ahi hadda wuxuu xaqiijiyaa nolol nidaameed dheer iyo waayo-aragnimo horumarsan.

Shaqada la bogay intii lagu jiray waqtigan waxaa kamid ah:

- Beddelida birta uu ku socdo tareenka ee dhamaatay
- Qaybaha wadada tareenka oo gaar ah
- Hagaajinta iyo xiridda shubka ku yaalo buundada Cedar Street.

Metro Transit

06-37-831850-25

# Anaga ayaa halkan kuu joogna!

Arag xulashooyinka aad ku tagi karto meel kasta oo aad rabto inta lagu jiro 9-ka maalmood ee uu xiran yahay Leenka Cagaaran ee METRO.

**OGSOONOW:** Goobaha laga helayo baska lagu beddelayo adeega tareenka waa mid la beddeli karo. Fadlan booqo **metrotransit.org/closure** wixii ku saabsan khariiradaha goobta baska iyo xogaha ugu danbeeya.

- Jidka baska beddelka ah
- Basaska aada Galbeedka
- Basaska aada Bariga Leenka
- Cagaaran ee METRO
- Leenka Cagaaran ee METRO ee la dhisayo
- Boosteejada Leenka cagaaran ee METRO Green oo la xiray




## Ku beddelida bas adeega tareenka

Ku beddelida bas adeega tareenka waxaa laga bixin doonaa boosteejooyinka la saameeyay waxayna raaci doonaa jadwalkii tareenka sida ay u saaamaxaan saxmadda gaadiidka iyo xaaladaha jiro.

Safarrada Raymond Ave. iyo Union Depot ee la isticmaalo baska lagu beddelay tareenka waxay qaataan qiyaastii 35 daqiiqo jiho kasta oo ay u socdaan.

Ka fiiri khariirada jidka meelaha laga raabo baska boosteejo kasta ama barta **metrotransit.org/closure**.

## Ku wado Baaskiil

Waxaad ku soo wareegi kartaa meesha oo dhan inta lagu jiro xilliga uu xidhan yahay adeega tareenka ama inta u dhaxeeyso boosteejooyinka marka loo baahdo. Basaska beddelka ah iyo tareenada korontada labadaba waxay qaabaan meelo si lacag la'aan loogu qaato baaskiilada.

## Jidadka kale ee uu mari karo baska

- **In la aado Bartamaha Magaalada Minneapolis/St. Paul:** Jidka 94
- **Marka la aadayo Garoonka diyaaradaha ee MSP:** Jidka 54
- **Marka la aadayo Mall of America:** Jidka 54
- **Marka la aadayo Snelling/University (adigoo u beddelanayo Leenka A ee METRO):** Jidka 94 ama Leenka B ee METRO B

